

Amarka L. 6

Taariikhda ay dhaqan galayso isu wareejinta awoodaha ee Maamulka Ingiriiska iyo Maamulka Maxmiyadda Talyaaniga ee Soomaaliya.

MAAMULKA WASAAYADDA SOOMAALIA EE TALYAANIGA

MAAMULAHA

Marka uu arkay xeerka Lr. 8 Febberaayo 1950, lamba. 12;

Marka uu arkay Dekereetada Madaxweynaha Jamhuuriyada Talyaaniga ee taariikhda 31 Maarso 1950;

Tixgaliyay, waafaqsanaanta qaybta B ee Heshiiska 289 (IV) ee Golaha Guud Qaramada Midoobay taariikhdu markay ahayd 21 Nofember 1949 iyo qodobka 23, sadarka labaad, Heshiiska Ilaalinta oo ay meelmariyeen Golaha Maamulka Wasaayadda, ee ka dhacay Ginevra, 27 Maajo 1950 iyo heshiisyada dhexmaray Dawladda Jamhuuriyadda Talyaaniga iyo Boqortooyada Britan, 1 April 1950, Dawladda Talyaaniga waxay qabatay maamulka ku-meelgaarka Dalka Soomaliya, iyadoo marka laga bilaabo 31 Maarso 1950 uu ka joogsaday awooddi ay ku lahayd Dawladda Boqortooyada Britan Dalkaas;

Iyadoo la Qaddarinayo awoodda la siiyay;

WUXUU AMAR KU SOO SAARAYAA

Qod. 1

Marka la eego saamaynta sharcinimo, Maamulka Wasaayadda Soomaaliya dalka Soomaaliya, sida uu qabo qod. 23, sadarka labaad, Heshiiska Wasaayadda uu meelmariyay Golaha Maamulka Wasaayadda, ee ka dhacay Ginevra 27 Jannaayo 1950, kana soo bilowday 1 Abril 1950.

Qod. 2

Amarkan wuxuu dhaqangalayaa maalinta lagu baahiyo Faafinta Rasmiga, wuxuuna dhaqangalayaa 1 Abril 1950.

Mogadisho, 12 Abriil 1950.

Maamulaha

Fornari